

## **XEER L. 82 rep.**

### **MAAMULKA WALAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA XOGHAYAHA GUUD**

MARKII UU ARKAY xeer 4 novembar 1951, n. 1301, kaas oo xeerinaya ilaalinta heshiiska dhulka soomaliya ee Talyaanigu maamulo siinayana fulin buuxda;

WAXAA LA AQOONSADAY baahida loo qabo in la dejiyo dowrad aqoon sare siineysa dadka degaanka oo loogu tala galay in saldhig adag oo waxbarasho loo abaabulo kuna tartamaan macallimiinta ka soo jeedda degaanka.

WAXAA LA GARTAY in xeerka ugu dambeeya ee dowrada ay tahay in la dhammaystiro iyadoo la tixgalinaayo horumarinta tartiib-tartiib ah ee heerka waxbarasho ee ardayda galaya dowrada kor ku xusan;

WAXA LA AQOONSADAY fursada ardayda ee dowrada kor ku xusan oo la doorto sannad walba laguna doorto tartamo imtixaan iyo heerkooda aqooneed;

IYADA OO LA TIXGELINAYO in dowrada lafteeda loo magacaabay macalimiin ku takhasusay si gaar ah oo ka imaanaya xagga macallimiinta uu soo xulo Madaxa dugsiyada dhexe ee Soomaaliya;

IYADA OO LA TIXGELINAYO haddii ay dhacdo in uu maqan yahay maamuluuhu fasax dartii, waxaa fulinaya howshiisa xoghayaha guud iyadoo la raacayo macnaha qod.. 2 ee Xeerka 47 ee 22 luulyo 1950;

IYADA OO LA DHEGEYSTAY Golaha dhexe ee Dugsiyada;

### **WUXUU XEEREEYAY**

#### **Qod. 1**

Waxa la asaasasy dowrad tababar macallimiin Soomaaliyeed oo loo sameynayo dadka degaanka Muqdisho.

#### **Qod. 2**

Si looga qaybgalo dowrada kor ku tilmaaman waxa la qaadanayaa arday macallimiin ah ee degaanka, kuwaas oo ku guuleysta tartan gaar ah oo la ogeysiinayo sannad walba.

#### **Qod. 3**

Xeerka dowrada kor ku xusan waxaa xeer ku soo saari doona Maareeyaha.

#### **Qod. 4**

Macallimiinta dhigaya maaddooyinka dugsiga waxa laga doortaa macallimiinta dugsiyada dhexe ee Soomaaliya. Wawaase si gaar ah loo qaadan karaa dad aan macallim ka ahayn dugsiga, waa haddii ay heystaan shahaaddo loo aqonsaday mudnaantooda.

#### **Qod. 5**

Waxa lagu xaddidaa mushaarka macallimiinta 10 Sh. So. saacad walba oo waxbarid. Waxa lagu bixin doonaa mushaarkaan asaga oo ku salaysan casharrada dhabta ah ee la bixiyey, taas oo uu ku soo saari doono maamuluuhu caddeyn iyada oo loo sii marayo Madaxa dugsiyada dhexe ee Soomaaliya.

## **Qod. 6**

Kharashaadka la xiriira shaqeysiinta dugsiga ee macallimiinta degaanka waxay koreysaa qdobka 67 mar labaad ee sannad maaliyadeed hadda socda iyo qdobka u dhigma sannad maaliyadeedyada xiga.

Kharashaadka la xiriira mushaaraadka ee lagu tilmaamay qdobka hore waxay korayaan qdobka 67 mar labaad ee sanadka maaliyadeedka hadda socda iyo qdobka u dhigma sannadaha soo socda.

Muqdisho, 27 Maajo 1952.

**XOGHAYAHA GUUD  
Canino**